




Guriga aan Wax Ku Wada Barrano

Hawlaha wax barashadda hore ee ciyaalka aan
Iskuulka gaarin iyo qoysaskooda



www.spl.org/Kids 206-386-4636

WAXAA KU JIRRO

Shan Waxyaabood oo kor loogu qaadaayo Akhristaha

- Hadal
- Heesid
- Akhris
- Ciyaar
- Qoraal

Waxqabadka: Sayniska

Warqadaha Xuruufta

Waraaqaha Xayawaanka





SHAN WAXYAABOOD OO LOOGU QAADAYO AKHRISTAHA

- 1. HADAL:** Hadalku waxa uu dhisaa luuqada iyo kalmadaha.
- 2. HEESID:** Heesidu waxaay dhistaa in caruurta ay maqlaan codad kala duwan.
- 3. AKHRIS:** Marar badan oo lagu celceliyo akhriska iyo sheekooyinka iyadaoo la adeegsanaayo sawirada ku yaala buuga.
- 4. CIYAAR:** Ciyaartu waa inay ka mid noqoto nolosha joogtada ee carruurta.
- 5. QORAAL:** Qoraalka Wuxuu dhisaa murqaha haddii la xariiqo iyo haddii la sawiroba.

WADA HADLA MARKAAD GURIGA WADA JOOGTAAN

Hadalka, magacaabida shayada, iyo isticmaalka kalmado kala duwan oo luuqadda soomaliga ah waxay kordhinaysaa ilmahaaga inuu kalmado badan barto. Mar kasta oo ay bataan kalmadaha ilmaha uu maqlaayo, waxaa badata kalmadaha uu baranaayo, waxayna u fududaanaysaa ku dhawaaqida kalmadaha marka uu bilaabo in uu wax akhriyo.



AYNU WADDA SOCONO:

Mararka qaar waxaan awoodaa in aan gaaro meel iga dheer, dheer, dheer.
(waxa aan kala bixiyaa gacmahayga oo aan gaarsiiyaa madaxayga korkiisa.)

Mararka qaar waan is yareeyaa yareeyaa , yareeyaa
(waan foorarsadaa oo waxa aan jidhkayga u aruuriya sida Kubadda oo kale)

Mararka qaar oo aan rabo in aan shay soo qabsado – gacmaha ayaan kala furaa.
(Istaag oo gacmahaada kala fur)

Mararka qaar waxaan isku wareejiga dhinaca anigoo aadaya dhinaca kale. (mararka qaar waxaan gacmahayga iyo jirjeyga oo dhan ka wajejiyaa dhinac waxana u wareejiyaa dhinaca kale.

Mararka qaar kor ayaan u boodaa waxaan soo taabtaa cirka.
(waxa aan boodaa aniga oo gacmahaygu ay madaxa korkiisa saaran yihiin.)

Markaasaan dhulka dib ugu dhacaa oo waxaan aan arkaa
(waxaan soo dhacaa farahay saaraa cidiyaha lugaha oon ku fariistaa)



WADDA SHEEKEYSI:

Raac oo la soo lugeey ilmaha (banaanka ama guriga gudihiisa). Kala sheekeyso waxaad aragtay, arkay, dareemey, urisay, dhadhamisay ama maqashay. Waxa aad u tilmaantaa qaababka kala duwan, iyo midibada kala duwan. Ciyaar ka sameysaa waxyaabaha ku saabsantiradda.

Markaad wax karinayso, ka hadal talaabo kasto oo aad qaadeyso. U sharax sida cuntada aad karinayso waxa ay ka kooban tahay loo dareemo, ay u ektahay iyo sida ay u carfeyso. La wadaag dareenkaada ama xasuustaada cuntada aad samaynayso.

Wakhtiga la seexanayo (Jiifka), sheeko sameey ama si fudud uga hadal wixii adiga iyo cunnugaada maalintaas aad sameyseen.



WARQADA JADWALKA CIYAARTA:

Ka qaado xayawaan warqaddaha xayaanka, laakiin ha tusin ilmahaada. U sharax cunugaada xayawaanka una ogolow in uu sawiro waxa aad u tilmaameyso. Isla sameeya sheeko ku saabsan xayawaanka wadajir.

GURIGA KU WADA HEESA SI WADAJIR AH

Si degan ugu hees luuqadaada markaas caruurta waxay awoodaan in ay maqlaan codadka yar. Tani waxay ka caawineysaa in ay ku ciyaaraan codadka kala duwan ayna bartaan kalmadaha cusub.



AYNU WADA SOCONO:



(Hadii aad ilmo socod barad ah ama aada schoolada xanaanada, ilmaha aad la samaynayso, wada istaaga. Waxa kale oo aad tan sidoo kale la samayn kartaa ilmo yar, adiga oo fiirinaayo oo dhabtaada ku haya, ama adiga oo u samaynaya dhaqdhaaq xagga jirkooda)

Madaxa, garabka, jilbaha iyo suulasha, jilbaha iyo suulasha

Madaxa, garabka, jilbaha iyo suulasha, jilbaha iyo suulasha

Indhaha iyo dhagaha iyo afka iyo sanko

Madaxa, garabka, jilbaha iyo suulasha, jilbaha iyo suulasha!






HEESA SI WADAJIR AH:

Waxa aad u heestaa ilmahaaga yar ama socod baradka maalin waldba marka aad wax samaysanayso, sida marka aad ka badalayso xafaayada iyo marka aad cuntada siinayso, iyo marka cayaar dhamaysaan, mid kalana aad bilabaysaan. Waxa aad ugu dartaa dhawaaq marka aad karto ama awoodo.

Isku badala qaybsashada heesaha aad uga jeceshahay.

Ma samaysan kartaan hees qoys ahaan? Ma samayn kartaa in aad sida caruurta oo kale iska dhigto ,oo aadan xataa u baahanin in aad kalmado sax ah aad isticmaalin!



WARQADA JADWALKA CIYAARTA:

Waxa aad isticmaashaa warqada Xarfaha, ku qoran yihiin ku hees xarfaha BTJ ama ABC, adiga oo tusaaya xaraf kasta oo welina heesaaya.

GURIGA KU WADA AKHRISTA

In aad si wadajir ah u akhrisataan maalin walba waa wax aad cayaarta ugu muhiimsan taa soo ka caawinaysa ilmaha in ay akhrinta diyaar u noqdaan. Idinkoo ku daraaya in aad u akhrisaan buugaag, tusinaayana akhrinaya kal-madaha adiga oo la akhrinayso ilmaha maalinta oo dhan. Taasi waxay ka caawinaysaa ilmaha in ay ogaadaan waxyaalaha qoran oo agagaarkooda ah.



AYNU WADA SOCONO:

Waxa aanu aadaynaa maktabada (wada socod)

Waxaan soo qaadnaynaa buugaag. (anigu waxaan ku soo baxsanayaa buugaagta labada gacmood)

Waxaan ku dhiibaa meesha lagu hubinayo buugaagta labadeyda gacmood (labada gacmoodba ku wada tilmaama)

Kala soo bixida (ku tilmaamtaan labada suul oo aad gadaal iska mariseen, garbahaada korkooda)

Waxaad tiraahdaa qaamuuska haye ama (hello) (adigoo gacmaha ruhruxaayo)

La soo baxida buugaagta.

Ku celinta

La soo bax hadana!



WADA AKHRIYA SI WADAJIR AH.:

Waxaad fiirisaa wargeeys ama maqaalo wada jir ah, kadibna goobo geli xarfaha oo dhan oo ka bilaawda xarfka uga horeeyo mid la mid a ilmahaaga magacooda.

Akhri iyo Waxkasta :

- Hadii aad isticmaalayso marka aad cashada karinayso, shey walbo qiyaastiisa uga Akhri waxa aad ugu akhridaa cod dheer ilmagaaga talaabo kasta oo aad qaado.
- Marka aad isku wada keento waxa aad cuntada ka samaynayso, waxa aad kor ugu akhridaa calaamada ilmahaaga. Waa inuu sheegaa xarfaha uu garto, sidoo kale!
- Waxa aad u tilmaantaa kalmadaha calaamadaha wadooyinka.

Marka aad buugaagta akhrineyso, waxaad utilmaantaa kalmadaha marka aad akhriyayso si markaas caruurta u arkaan ka inaad akhriyayso xarfaha oo aanay ahayn sawirada. Waxa ay taasi ka caawinaysaa inay fahmaan jihada akhriska ee luuqada (tusaale ahaan, in Ingiriiska marka la akhriyayo bidix laga bilaabo oo midig lagu dhameeyo).

WARQADA JADWALKA CIYAARTA:



Waxaad ka raadisaa guriga ama bannaanka qaabka warqaddaha xarfaha. Keen kaararka xarfaha kana fiiri gurigaaga agagaarkiisa iyo deriska waxyaabo u eg xaruufta. Magac sii markaad hesho. Tusaale ahaan, doon Ul u eg xarfka "Y", Jijin taas oo u eg xarfka "O" qaab, ama kabaha xirigooda oo u ekaan karo xarfka "S" qaabka .



GURIGA AAN KU WADA CIYAARNO

Ciyaarta wadajirka ah waxay ka caawisaa carruurta in ay si toos ah rabitaankooda u sheegtaan ooyna ku bedelaan figradooda wax qabad iyo oraa. Ciyaarta waxay caawisaa ilmaha in ay fahmaan waxa lagu hadlo iyo waxa la qoro waxay matalaan wax jiro iyo wixii lasoo maray.




AYNU WADA SOCONO:

*Gacmaha kor u taag, lul lul lul (RUX)
(gamaha kor u qaad madaha korkiisa, lul (RUX) gacmaha)*

*Gacmaha hoos u dhig, lul lul lul (RUX)
(gacmaha hoos u dajia ilaa iyo jilbaha, lul or rux
gacmahaaga)*

*Gadaal u jeeso, lul lul lul ama rux
(jidhkaaga jeedi, lul gacmahaaga)*

*Taabo dhulka, lul lul lul ama rux
(taabo dhulka, lul ama rux gacmahaaga)*





AAN WADA CIYAARNO:

Ciyaarta aan bilowno Aniga waan idin basaasayaa anigoo isticmaalaya midibadda. Dhex: "waan idin basaasay, indhexeeyga yar, ama wax jaalle ah. Maxaad aragtaa oo jaalle ah oo laga yaabo in aan fiirinaayo?" Aan ciyaarno waan idin basaasayaa annigoo isticmaalaya xaruufta. Tuseele ahaan, "waan idin basaasayaa, indhaheeyga yar, wax ka bilaabanaayo xarafka B. Maxaad arkeysaa oo aan fiirinaayaa ee ka bilaabanaaya xarafka B?"

Sameey ciyaarta aan dhaqdhaqaaqa lahayn. Waxaad ku ciyaartaa hees aad jeceshahay. Marka aad joojiso muusiga, dhamaan dadka ciyaaraayo waa ay joogsanayaan dhaqaaqa isla markaana halmeel ayeey ku istaagayan ilaa muusikada uuw ka bilaawdo marlabaad.

Waxa aad sawirtaa adiga iyo saaxiibadaa oo wadda ciyaaraayo. Saaxiibaddaada kee baad u xiistay? Maxaad jeceshihiin inaad samaysaan marka dambe oo aad is aragtaan? Telefoonka ku wac mid ka mid ah saaxiibadaa una sheeg mida ayada ah.

WARQADA JADWALKA CIYAARTA:



- U ogolow ilmahaagu in uu ka doorto xayawaan warqadda Xayawaanadda. Waxa aad ilmahaaga weydiisaa in uu iska ekeysiiyo sida xayaawaankaas marka aad uga sheekeeyneyso. Sida xayawaankaas ha usocdo, codka ha ka dhigo sida xayawaanka, ama ha u dhaqmo sida sheekada.
- Waxa aad isticmaashaan Warqada Xuruufta, waxaad dhigtaa xarfo kaladuwan guriga dhinacyadiisa. Kadibna waxa aad wacdaa hal xaraf oo xarfaha ka mid ah, ka dib dhiiri geli ilmahaada inuu markaa u boodo xarfkaas.

KU QORA GURIGA SI WADAJIR AH:

Laga bilaabo qabashada qalinka Midibka, ilaa qorista xarfaha iyo kalmadaha, caruurta waxa ay bilaabayaan inay bartaan sida wax loo qoro inta da'dooa tahay labo sanno. Falaadka ay iska falaadayaa wuxuu ka caawiyaa ilmahaaga in ay bartaan sida wax loo khoro iyo sida loo akhriyo!



AYNU WADA SOCONO:

Sida geedka ayaad u dheer tahay ilaa iyo intii ayaad dheraan kartaa? (Si toosan u istaag adigoo gacmahaagana kor to taagaya si aad u soo taabato tarniiga iyo saqafka)

Sida guriga ayaad u balaaran tahy, ilaa iyo intee ayuu balaarkaagu noqon karaa? (Kala bixi gacmaha iyo lugaha si aad u kala fog)

Caato u noqo sida biinka ilaa iyo intee ayaad caato noqon kartaa? (Si dheer oo toosan u istaag, adigoo farahaaga dhulka ku fiiqaaya.)

Isu yarey sida jiidka, ilaa intee ayaad yaraan kartaa? (Iku yareey sidii kubad yar)

U dheer sida geedka, u balaadhan sida guriga, u dhuuban sida biinka, u yar sida jiidka (waxad samaysaa mid walba inta goor aad rabto in aad samayso!)




AAN SI WADAJIR AH U QORNO:

Hakuu yaalaan qalimaanta midibada ah iyo waraaqo guriga, si ay marka caryuurtaada yaryar ay rabaan ugu falaadi karaan. Qabashada qalinka midibka iyo sida loo xariiqo ayaa ka mid ah talaabada ugu horeysa oo uu ilmahaagu bilaabay in uu barto sida qalinka loo qabto. Taasi waxay ka caawinaysaa in ilmahaagu qoro malin maalmaha ka mid ah!

Waxa aad ilmahaaga ka caawisaa inuu barto qaababka. Waxa aad wada barbarataan inaad sawirtaan qaababka, si wadajir ah ama waxa aad u tilmaamtaa buugaagta. Caruurta waxa ay marka kowaad u bartaan xarfaha sida qaabka oo kale.

Ilmahaagu ha barbarto qorista magiciisa. Waxa aad uga sheekeysaa sheeko markaa uu magiciisu ku yimid. Waxa aad u tilmaamtaa kalmado kale oo markaa ku bilaawdo xarfka magiciisu uu ku bilaabmo.



WARQADA JADWALKA CIYAARTA:

Waxa aad ilmahaaga u caawisaa inuu la soo baxo xarfka magiciisu uu ka bilaabmayo oo uu ka doorto warqada Xarfaha. Waxa aad ka fikirtaan xayawaan ka bilaabmaya isla xarfkaas uu ku bilaabmo magiciisa, oo waxa aad ka caawisaa inuu sheeko ka sameeyo xayawaankaas. Waxa aad ku dhiiri gelisaa inuu qoro/sawiro sheekada xaashidiisa oo waxba ku qornayn iyo isaga oo isticmaalaya midibadda, inuu sawiro sawirada. Waxa aad u akhridaa sheekada isaga marka aad dhamayso. Ama waxa aad u sheegtaa inuu sheekada kuugu soo celiyo!

AAN KU SAMAYNO GURIGA SAYNISKA SI WADAJIR AH

Su'aalaha la waydiinaayo iyo fiirinta ayaa ah habka ilmuhu macno ugu samayn lahaa wax kasta oo adduunka agaagaarkiisa ah. Waxa aad qaadataa wakhti aad ugu sharaxayso waxa aad arkayso iyo khibrada si wadajir ah, oo waxa aad is barbar dhigtaa ama aad u tilmaamtaa sida wax walba u kala duwan yihiin. Caruurta yaryar waxa ay jecel yihiin inay wax kasta ogaadaan: Waxaay yihiin saynis yahano dabiici ah!



AYNU WADA SOCONO:

[Istaag oo waxa aad ku ciyaartaa kalamado isku eg]

Soo dhawee, soo dhawee, soo dhawee, Waxa aanu aadaynaa dayaxa.

Soo dhawee, soo dhawee, soo dhawee, Mar dhow ayaan aadaynaa.

Haddii aad doonayso in aad safar aado, waxa aad gashaa markabka dhagaxa ah.

Soo dhawee, soo dhawee, soo dhawee, Waxa aan aadeynaa dayaxa.

5, 4, 3, 2, 1... DUUL!

[waxa aad tartiib ugu tirisaa farahaaga oo kadibna bood!]



AAN WASAJIR U SAMAYNO SAYNISKA

Aan dalxiis aadno gudaha (ama banaanka) oo waxa aad fiirisaa shayaal isku mid ah: waxyaabaha yaryar, waxyaabaha cagaarka ah, waxyaabo jilicsan, iyo wax kasta oo aad ka fekerikarto!

Waxa aad samaysaa tijaabo dedhemin oo ah cuntada aad cunaysiin oo dhan. Waxa aad isku qabataa indhaha oo waxa aad sharaxdaa dhadhanka, urka iyo qaabka waxa aad dhedhemisay. Afka gashatayba.

Waxa aad la wadaagtaa sheeko sida aad u xalisay dhibaato ku soo martay noloshaada. Ama, waxa aad sharaxdaa wax aad is waydiisay waxay ku saabsanaayeen waxa aad ka baratay.

Waxa aad sawirtaa wax aad guriga ku aragtay ama bannanka. Waxa aad kala sheekeysataa wixii uu ilmahagu uu ku xasuusto markii uu isku dayayay inuu sawiro wax ka mid ah noloshiisa uu soo maray.

WAQADA MADADAALADDA JADWALKA:

Adiga oo isticmaalaya warqada Xayawaanadda, waxa aad kala shaqaysaa ilmahaaga in uu kala saaro qaybaha kala duwan. Xayawaankee midkee ayaa Jaale ah? Xayawaankee ayaa afar lugood leh? Waxa aad abuurtaa qayb adiga aad jeceshahay!



Proudly sponsored by



The Seattle Public Library Foundation

www.SupportSPL.org